

TIRTIR LEAD!

KABADBAADI QOYSKAADA SUNTA LEAD

Dhallaanka, carruurta kayar 6 jir, iyo haweenka uurka leh ayaa halis u ah sunta lead ka

WAA MAXAY WAX YEELADA JIRKA KASOO GAARTO SUNTA LEAD?

- Waxay dhaawacdaa maskaxda canuga.
- Waxay adkeysaa waxbarashada iskoolka, xakameynta dabeecada iyo go,aan gaarista.
- Waxay sababi kartaa inay haweenka dhalaan ilmo uu miisaankooda hooseeyo, ilmo dhicis ah iyo meyd ah.

SIDEE BAY CARRUURTA IYO HAWEENKA UURKA LEH KU SUMOBAAN?

- Sunta lead ka waxay sida badan kasoo gaari kartaa qofka degan guriga lamariyey rinji lagu daray lead ama biyaha lacabo oo ay lead badan ku jirto.
- Carruurta waxay lead ka jjabka iyo kan daqiiqa ah kaqaadaan markay gurguurtaan iyo ay ku ciyaaraan sagxadda dhulka.
- Carruurta waxay lead cunaan marka caaga yar ee lagu aamusiiyo ay nuugaan iyo alaabta ay kuciyaaraan kuwaasoo ay kaqaadeen dhulka oo lead leh.
- Haweenka uurka leh iyo carruurta lead daqiiq ah waxay kageli kartaa sanko marka ay neefsadaan.
- Waxaa laga qaadi karaa alaabta carruurta ee wadamada kale laga soo iibiyey, waxa laismariyo, rinjiga timaha, iyo cuntooyinka ay lead kujirto.

SIDA LOOGA HORTAGO QAADIDA SUNTA LEAD?

- Iska ilaali jajabka iyo daqiiqa rinjiga gurigaada (qaasatan agagaarka daaqadaha iyo xakabadda daaqadaha).
- Kanadiifi sagxadda dhulka iyo xakabadda daaqadaha jajabka iyo daqiiqa lead ka. Mari xaaqin qooyan, tirtir inta badan.
- Dhaq alaabta ay carruurta kuciyaaraan iyo gacmahooda inta badan, khaasatan inta ay cuntada cunin kahor.
- U isticmaal biyo qabow oo socday ilaa 30 il biriqsi cabitaanka, karinta iyo qasidda caanaha ilmaha dhashay.

SIDEE KU OGAAN KARTAA IN ADIGA AMA CARRUURTAADA AAD QAADEEN SUNTA LEAD KA?

- Sida kaliya ee lagu ogaan karo in canug ama haweenka uurka leh inay leeyihiin sunta lead ka waa in laga baaro dhiigooda.
- Weydii dhaqtar canugaada ama rugta caafimaadka inay ka baaraan dhiigiisa lead da,da markay tahay HAL sano JIR iyo markale LABO sano JIR.
- Haweenka uurka leh waa u sheegaan dhaqtarkooda haddii ay degan yihiin guri ladhisay kahor sanadka 1978 oo leh rinji jajab ama mid daqiiq ah.

MAQABTAA DAREEN AH INUU GURIGAADA LEEYAHAY LEAD?

SOO WAC LAMBARKA MAGAALADA 311!



Waxii Warbixin: wipeoutlead.com • MAYOR BYRON W. BROWN